

# Dugsiyada ay ardayda St. Paul mudan yihiin

## Sababta ay bareyaashu diyaar ugu yihiin inay shaqo joojin ugu sameeyaan iyagu

### **Waa maxay waxa ay bareyaashu u dagaallamaan marka laga gorgortamayo qandaraasku?**

Ahmiyadaha ugu sareeya ee bareyaashu xiliga gorgortanka waxaa ka mid ah:

- In dhismo kasta lahaado koox caafimaad maskaxeed oo leh shaqaalo ku filan. Tani waxaa ka mid ah in macallimiinta la siiyo tababaro dheeraad ah iyo in la shaqaaleysiya shaqaale bulsheed, la-taliyayaal, cilmi-nafsi yaqaanno, kalkaalayayaal caafimaad oo badan oo dugsiga joogo iyo takhasuslayaasha wax ka qabto dabeecadda.
- Shaqaale badan oo luqado badan ku hadla si ardaydayada iyo qoysaskayaga looga caawiyo inay ku xirnaadaan bulshada dugsigooda.
- Bareyaal dheeraad ah oo taageera ardayda leh baahiyo gaar ah iyo meeleyn munaasib ah oo loogu talagalay bareyaasha si ay fiiro dheeri oo weji-ka-weji ah u siiyaan arday kasta.

Isbeddeladani waxay jawiga waxbarasho u wanaajin doonaan dhammaan ardayda St. Paul waxayna u oggolaan doonaan bareyaasha inay fiiro gaar ah oo shaqsiyadeed siiyaan caruurta. Waxay sidoo kale jawiga shaqada u wanaajin doonaan bareyaasha - waxaan rabnaa inaan ardayda St. Paul u soo jiidno una reebno bareyaasha ugu wanaagsan.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan soojeedinada ka hel [supportstpaulstudents.org](http://supportstpaulstudents.org).

### **Maxay gorgortanada qandaraasku u yihiin kuwa dooda keena? Shaqo joojin miyaa dhici doonta?**

Bareyaasha St. Paul waxay fahamsan yihiin in gorgortanada qandaraasyada ee dooda keena iyo shaqo-joojinta dhici karta ay walaac ku yihiin dhammaan dadka ku lugta leh - gaar ahaan qoysaska shaqeeya iyo ardaydayada ugu nugul.

Sharciga gobolku wuxuu farayaa in degmada iyo shaqaalaha midoobay ay gorgortamaan labadii sanaba mar. Gorgortanada udhaxeeya SPFE iyo degmada ayaa bilaabmay bishii Maajo ee lasoo dhaafay. Midowga wuxuu sagaal kalfadhi dadweyno ku soo bandhigay 31 soojeedino. SPFE waxay codsadeen dhexdhexaadin bisha Nofeembar sababtoo ah degmadu wax jawaab ah ma aysan ka bixin soojeedinadaas.

Shaqo-joojinta cabsi ayay gelisaa qof walba waxayna sidoo kale saameyn dhaqaale ku yeelan kartaa bareyaasha. Laakiin waxaan diyaar u nahay inaan sameyno huritaan si aan u xaqiijino in baahiyada ardaydayada la daboolo. Waxaan dhammaanteen rabnaa in dugsiyada dadweynaha ay lahaadaan kheyraadka ay u baahan yihiin. Nasiib darro, taasi ma dhacdo.

Golaha fulinta ee SPFE ayaa amar ku bixiyay in codeyn shaqo-joojin la qabto Febraayo 20. Xubin kastoo ka mid ah midowga ayaa ka codeyn kara doorashadaas.

### **Goorma ayay shaqo joojinta bilaaban doontaa?**

Haddii xubnuhu oggolaadaan shaqo joojin, waa mas'uuliyada guddiga fulinta midowga inuu dejiyo taariikhda shaqo joojinta. Sharciga gobolka ayaa uga baahan midowga shaqaalaha inay siiyaan degmada ogeysiis ugu yaraan 10 maalmood kahor maalinta ugu horeysa ee shaqo joojinta.



SAINT PAUL FEDERATION  
OF EDUCATORS LOCAL 28

## ***Haddii ay shaqo joojin dhacdo, maxay taasi uga dhigan tahay ardayda iyo qoysaska St. Paul?***

Dugsiga Degmada wuxuu gaari doontaa go'aan, laakiin waxay u badan tahay inay xiri doonaan dugsiyada inta lagu gudajiro shaqo-joojinta. Waalidiintu waxay u baahan doonaan inay ardaydooda u helaan xulashooyin kale. SPFE waxay ardaydayada ugu nugul u baaraysaa xulashooyin lagu helayo goobo ammaan ah. Macluumaad dheeri ah ayaa la heli doonaa marka qorshooyinkan la sameeyo. Waxaa sidoo kale suuragal ah in Magaalada St. Paul ay u furi doonto ardayda xarumo madadaalo iyo maktabado.

## ***Degmadu miyay ku dari doontaa maalmo dugsiiyeed dheeri ah haddii shaqo-joojin dhacdo?***

Khasab maaha. Haddii degmadu hoos uga dhacdo tirada ugu yar ee maalmaha ee ardayda dugsiga dhexe iyo dugsiga sare loo baahan yahay inay ku jiraan dugsiga, degmadu waxay ku dari kartaa maalmo. Laakiin wax ganaax ah ma jiro marka la eego sida uu dhigayo sharciga gobolka haddii degmadu aysan buuxin shuruudahaas.

## ***Miyuuna midowgu taageerin xubnaha hadda ka tirsan guddiga dugsiga?***

Haa, SPFE way aqbaleen xubnaha guddiga. Nasiib darro, way iska caddahay in gorgortanadan aysan gacanta ku haynin guddiga balse uu gacanta ku hayo Maamule Joe Gothard. Warbixinta la siinayo xubnaha guddiga waxay u muuqataa mid xaddidan oo xulasho ku salaysan. Waxaa la joogaa waqtigii uu gudigu dalban lahaa macluumaad dheeri ah kuna lug lahaan lahaa gorgortanada.

## ***Sidee waalidiinta, ardayda iyo xubnaha bulshada ku heli karaan warar cusub oo ku saabsan gorgortanada?***

Saxiix codsiga SPFE ee laga heli karo <https://actionnetwork.org/forms/support-spfes-bargaining-priorities> si aad u gasho liiskayaga xulafada bulshada. Waxaad sidoo kale nagala socon kartaa Facebook (Saint Paul Federation of Educators iyo Twitter oo aad nagala socon karta @spfe28 (hashtags #WeAreSPPS iyo #WeAreSPFE).